



STAY SAFE MN

Waa maxay sababta ay tahay inaad u hesho Tallaalka La Cusbooneysiyyay (Labada Jir-lid-dhaliye Leh) ee Xoojinta ah.

Qof kasta oo da'diisu tahay 5 jir ama ka weyn ayaa hadda lagula talinayaa inuu qaato tallaalka xoojinta ah ee COVID-19 oo la cusboonaysiiyay, oo sidoo kale loo yaqaano tallaalka labada jir-lid-dhaliye leh ee xoojinta ah. Haddii ay ka soo wareegtay ugu yaraan 2 bilood tan iyo markii ugu dambaysay ee aad qaadatay tallaalka COVID-19, waxaa laga yaabaa inaad u-qalanto. Halkan waxaa ku qoran saddex shay oo ay tahay in laga ogaado sababta tallaalka xoojinta ah ee la cusboonaysiiyay ay muhiim u tahay in la qaato.

Wuxuu ka hortagaa nooca asalka ah ee COVID-19 iyo sidoo kale noocyada cusub.

Adiga ama qoyskaaga ayaa laga yaabaa inaad horay u qaadateen cirbad xoojin ah, balse midkaa ayaa kaliya kaa ilaalinayay nooca asalka ah ee COVID-19. Hadda waxa jira noocyo cusub (BA.4 iyo BA.5) oo socda kuwaasoo dadku ay qaadaysaan. Tallaalka xoojinta ah ee COVID-19 ee la cusboonaysiiyay wuxuu bixiyaa kahortagga nooca asalka ah iyo noocyadaan cusub.



Wuxuu gacan ka geystaa in kahortagga COVID-19 sarreeyo.

Waqti kadib, kahortagga tallaalku wuu is dhimi karaa. Tani waxay la macno tahay in adiga ama qoyskaagu ay u badan tahay inaad si daran u xanuunsataan. Helitaanka tallaalka labada jir-lid-dhaliye leh ee la cusboonaysiiyay marka wakhtigiisa la gaaro waxay kaa caawin doontaa in kahortagga COVID-19 sarreeyo.

Wuxuu bixiyaa kahortagga ugu fican ee kiisaska daran ee COVID-19.

Tallaalka xoojinta ah ee la cusboonaysiiyay waxaa loo sameeyay si loola dagaallamo noocyada COVID-19 ee inta badan ka dhacaya bulshooyinka waqti xadirkan. Cirbadihii hore waxay gacan ka geysteen kahortaga jirrada halis ah iyo isbitaal u dhigista noocii asalka ahaa ee COVID-19, oo tallaalka xoojinta ah ee la cusboonaysiiyay ayaa gacan ka geysta inuu si gaar ah uga hortago noocyada cusub si aysan dadka ugu bukaan.

Hel tallaalka (labada jir-lid-dhaliye leh) xoojinta ah ee la cusbooneysiyyay marka aad u-qalanto si aad u hubiso inaad haysato kahortagga ugu fican!

Kala hadal bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga haddii aad wax su'aalo ah ka qabto tallaalka xoojinta ah ee la cusboonaysiiyay iyo goorta aad qaadan karto. Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah, oo ay ku jiraan goobaha aad ka heli karto tallaalka xoojinta ah ee cusub ee bilaashka ah, barta [Cirbadaha Xoojinta ah ee Tallaalka COVID-19 \(https://mn.gov/covid19/vaccine/boosters/index.jsp\)](https://mn.gov/covid19/vaccine/boosters/index.jsp).

